
RIYO KA WAYN

QiSADii DiiNi



QISADII DIINI

Iyadoo looga reebay waxyaabaha qaar si ay ugu habboonaato jillidda, haddana markii la soo baadhay ee la xaqiijiyay qisadan dhabta ah waxaa loo soo bandhigay sidii ay u dhacday.

www.morethandreams.org
somalia@morethandreams.org
© 2014 All Rights Reserved

Noloshu – sida safarka oo kale – waxay leedahay hakadyo. Marmar waxaa naga luma toobiyaha, mararka qaarna waxaa na xayira jidgooyo. Oo kolkolna waxaa dhaca waxyaabo wanaagsan oo aynaan filanayn.



Sidaas oo kale sheekadanu waa safar, waana safarkii noloshayda. Magacaygu waa Diini Widyaningtias; anigu ma ahi jilaa. Waxaanse ahay Diini, tii runta ahayd ee qisadanu ku dhacday.

Haddaba ha inoo billowdo safarku.



Waxaan aaday safar shaqo, waxaana saaraa tareenka isaga goosha Jakaarta iyo Yogyakarta...

Mudane, iga raalli ahow. Maxaan u joogsannay?

Baayo, war kama hayo. Waxaa dhici karta in cillad jirto.

Waa hagaag, goormaad wax ogaan doontaa?

Markaasuu tareenkii si lama filaan ah u istaagay.


Maxaad aragtaa?

Ma doonayaan inay halkan naga kaxeeyaan, soo maahan?

Ma malayn kartaa…

Maxay? Maxaan maleeya?


Waxaan ku koray halkan, meelahan.
Runtii? Oo waad garan halkaan joogno?
Gombong.
Gombong?
Walaashayna waxaan ku balanay Yogyakarta. Goormaan gaadhi doonnaa?
Shan iyo toban sano ka hor
?
3


Reer Tedjo Kurniawan?
Kurniawan wadnahaa laga qabtay… waan ku dadaalay inaan caawinno, laakiin… wuu dhintay.
Siday ku dhici kartaa… ma dhici karto. Tedjo wuu dhintay? Ma dhici karto! Ilmahaygu siduu noqon doonaa?
Waan ka xumahay. Annaba waan idinla murugaysan nahay.
Middan ma qaadan karo. Maxaan sameeyaa?
Way hagaagi, Sundari. Way hagaagi...
Aabbahay wuxuu xidhiidh qarsoon la lahaa habaryar Sundari – hooyaday walaasheed. Waxayna lahayd uur sideed bilood ah markuu aabahay dhintay. Laakiin intaa kaliya ma ahayn...
Hooyadayna markaa uur baylahayd. Ma aanan garanayn wax aan sameeyo iyo meel aan u ciirsado. Waligay waxaan aabbahay u arkayay halyay.
Mudanayaal iyo marwooyin. Assalaamu calaykum. Wa raxmatullahi wa barakatuhu. Waxaan rajaynayaa inaad cafiyi doontaan.
Wixii khaladaad ah ee uu sameeyayna anigaa mas'uul ka ah. Assalaamu calaykum wa raxmatullaahi wa barakatuhu.

Waxaan filayaa in habaryartay Sundari ay noogu murugo badnayd, inkastoo markaa aanan sidaa u garanayn. Waxay dareentay sharaf-darro maadaama ay xidhiidh la lahayd aabbahay, oo ay uur yeelatay. Waxay ka tagtay Gombong, iyadoo meel ay u kacdo aan aqoon.

Tedjo wuxuu lahaa saaxiib labaad.

Xaggeed waxaa ka soo maqashay?

Atin Sinjaya… Ina adeerteed middii shalay timid.

Ina adeerteed waa middee?

Waa midda uu qabo tagsiiluhu.

Ma aanan ogayn in walaalkaa Tedjo uu ahaa nin heer sare ka gaadhay sawiridda.

Walaalkay wuxuu lahaa xirfado badan. Runtii xirfado badan.

Gaar ahaanna xagga dumarka.

Yaan aqoon u lahayn Tedjo Kurniawan?

Meel kastaba, naagtuu doono wuu heli karay.

Haa, haa. Waan arki doonnaa siduu reerku noqdo. Waxaa ugu murugo badan arrinta Sundari.

Mar aan fogayn albaabkaygay soo garaaci doontaa, iyadoo baryootami. Laakiin anigu diyaar uma ahi inaan caawiyo.

Dadkii aan islahayn way idin gargaari doonaan ayaa u hadlayay si qalbiga dhaawacaysa. Markaa ma aanan garanayn wax aan sameeyo.



Waxaan dareemay in Eebbe kaliyu noo gargaari karo.



Meeshaa mar dambe Kuma aanan noqon. Markii dambe een hellay xaqii aabbahay, waxaan u guurnay Semarang.




Si aan masruuf uga hello, hooyaday waxay guriga dhiniciisa ka furatay dukaan yar. Laakiin dhaqaale-xumo way jirtay mar walba. Waxaana dhacday hooyaday in ay laba gabdhood iyo wiil walaalahay ah dad siiso.



Waxaa kaloon maqlay in xaalladda Habaryartay Sundari ay aad u xumaatay. Markay wiilkeeda dhashay, waxay u guurtay Sukoharjo si ay ula noolaato ayeeyday. Waxaan joognay laba sano. Kuwaasoo ahaa sannado noloshu nagu adkayd.





War naga taga! Ha caayina wiilkayga! Na dhaafa idinkoo dhan, taga!

Naayaada, maxaad la aamusan tihiin? Kuwanu miyaanay caruurtiina ahayn?

Naayaa hooy! Ma ogtahay, cidina kuma odhan sharkaaga magaaladan keen. Yaa ku baray ninkaad kulantaanba inaad la seexato?


Meel kaloo ay aadaan madaama aysan haysan, Habaryar Sundari iyo Bambang waxay yimaaddeen Semarang. Hooyaday way u qalbijileecday Sundari, anigoon raalli ka ahaynna waxay oggolaatay inay nala joogaan.

Halkan maxaad ka samayn? Naga tag baan ku idhi! Ma ogtahay, waan ku necbahay!

Hooy, yaa iska leh xusuus-qorkaa? Yaa kuu fasaxay inaad akhrido qof kale xusuus-qorkii? I sii!

Markaan arkay Habaryar Sundari oo akhrinaysa xusuus-qorkayga waan is xajin waayay. Inkastoo ay dhici karto inaan waxyaabo cadaawad ah oo ku saabsan iyada iyo Bambang inaan qoray, haddana run bay ahaayeen. Waxaana hooyaday u sheegay inay kala doorato aniga iyo iyaga.

Waxay ahayd inaan ku farxo Habaryar Sundari iyo Bambang oo ku noqonaya Sukoharjo, waana ku faraxsanaa, laakiin cadhadii aan labadooda u qabay waxay keentay inaan u cadhoodo qof kale – qofkaas oo ahaa hooyaday.



Waxaan ogaaday inay qorshaysatay inay nin kale guursato, go'aankaas oo aysan qoyska intiisa kale kala hadlin.



Waxaana billaabay inaan iswaydiiyo, maxay faa'iido leedahay inaan maalintii shan jeer tukado, ama inaanan dugsiga wax sirin?



Inaan dembi iska dhawro maxaan ka faa'iidayaa? Mar haddaanan cafiyi karin hooyaday janno ma geli doonno, sidaa darteed waxaan go'aan ku gaadho in aanan diin danayn.



Waxaan billaabay inaan xeerarka oo idil jebiyo. Wuxuu ahaa sannadkaygii koowaad ee dugsiga sare. Wax kasta oo aan rabay waan sameeyay, laakiin markaa kadib waxaan arkay waxyaabo argagax leh.



Waxaan arkay gabadh asxaabtayda ka mid ah oo uu ka soo daatay ilmihii uurkeeda ku jiray oo sibidhka ku rafanaysa dhiigna uu ka socdo…



Iyo mid kale oo asxaabtayda ka mid ahaa oo tuugo intii lagu qabtay xabsiga loo wado.




Waxaana iswaydiiyay: ma dhabbaa inaan noloshaas oo kale rabo? Nolol ku hoos jirta xukunka diintu ima aysan farax galin, haddana nolol ka madax-bannaan xukunka diintu ma ahayn iyana mid aan rabay.



Markii la gaadhay bisha Ramadaan, waxaan is arkay anigoo diintaydii ku laabtay.



Waxaan billaabay inaan akhriyo Qur'aanka oo waxaan aad u doonayay inaan Ilaah u dhawaado. Runtii waxaan rabay inaan nabad helo.



Waxaan isu diyaariyay salaadda Tahajudka. Waxaan rabay inaan waxyaabo badan Ilaahay waydiisto.




Waxaan aad u aaminsanaa habeenkaa waxkastoo aan waydiisto, in Ilaahay iga maqli oo jawaabna iga siin.



Waxaan ku tukaday aayadihii aan xafidsanaa.



Runtii, waan qalbijabsanaa, waxaana u cabtay Ilaahay.



Ilaahayoow, waxaa qalbigayga ka go'an, inaan waxkasta oo kale ka horaysiiyo adiga inaan ku raalligaliyo. Itus jidka, oo waan kuu raaci doonaa, meelkasta oo aad ii hoggaamiso. Laakiin haddii aad jidka itusi waydo caawa, ha igu eedaynin wixii dhaca. Hana igu eedaynin inaan u noolaado sidaan anigu doorto. Laakiin haddii aad itusto kan aad tahay iyo waxaad iga rabto, markaa waan kuu raacayaa halkii aad ii hoggaamisaba.



Isla markaa,
nuur baa hortayda
ka soo baxay.

Wuxuuna yeeshay
muuqaalka nin
khamiis cad qaba.



Si bayaan ah wajigiisa
uma aanan arki karin,
laakiin xasilooni iyo
qalbiqaboojin ayaa
weheliyay.



Durbadiiba, sidaan
ku gartay ma ogi,
balse waxaan
xaqiiqsaday
inuu Ciise yahay.
Wuxuuna yidhi,



Diini, isoo raac.



"Sayidow, waxaan ahay
Muslim. Siday ku dhici
kartaa inaan ku raaco?
Waxaad tahay Ilaaha
gaalada, kuwa aan
Alle aqoon."



Wuxuu sugay inaan u
tago isaga. Waxaa
dhabanadayda ka
dareeraysay illin,
kadibna waxaan idhi,



"Eebbow, haddii kanu
yahay jidka runta, waan
rabaa inaan ku raaco."



Isla markaa, waxaan dareemay nabad aanan waligay dareemin.

Waxaan arkay isagoo dhoolla-caddayn, dabadeedna tartiib ayuu u tagay.

Abbaayo, waxaan filayaa in aanan kugu gafin.

Marnaba sidii hore ma ahaan doono. Maalintaa laga billaabo marnaba middii hore ma ahayn.

Waxkastoo dhacayba waxaa xaqiiqo ah inuu aad kuu saameeyay.

Waan fahmay. Kadibna maxaa dhacay?

Waxaan billaabay inaan raadiyo qof Masiixi ah. Waxaan aqaanay reer Masiixi ah oo degganaa tuulo noodhaw.

Waxaan billaabay inaan u tago. Markii hore way iga cabsadeed waayo waxaan waydiistay Kitaabka Qudduuska, laakiin markii dambe way isiiyeen waxaana billaabay inaan akhriyo. Waxkasta waan ka qariyay hooyaday, hase-yeeshee muddo yar kadib way ogaatay.

Hooyooyinku markasta wax way ogaadaan. Intaa kadib maxaa dhacay?

Waad habaaran tahay! Mar dambe reerkan kama tirsanid!

Iskadaa hadal-xumada! Waxay u baahan tahay wakhti ay kaga soo fekerte.

Wakhti badan oo ay kaga fekerto way haysatay! Xaalku hadda wuu fogaaday! Fogaa! Fogaa!

Ballan baan Eebbe u qaaday hadduu jidka i tuso, inaan isaga raacayo. Ujeedadaydu ma aha inaan qof wax u dhimo, laakiin anigu go'aan waan gaadhay.

Diini, hooyadaa iyo aniguna go'aan waan qaadannay. Haddaan nahay Muslimiin xil wayn ayaa naga saaran barbaarinta caruurtanada.

Adeerkaa wuxuu ula jeedaa in mar dambe aadan xaq u lahayn in aad waalidkaa wax waydiisato. Haddaba, waxaaga qaado oo tag.

Ma garanayo kartidu meesha ay iiga timid, laakiin gurigii waan ka tagay oo u kacay magaalo kale oo la yidhaa Solo. Waxaana ahaa 16 jir.

Waxaan kiraystay qol oo waxaan billaabay iskuul si aan u barto adeegga bulshada. Waxaan helay shaqo saacado yar iskuulka kadib aan ka shaqeeyo oo i anfacday.

Waxaana Solo joogay saddex sannadood. Reerka marmar baan booqasho ugu imaan jiray. Markaan iskuulka ka qalinjabiyay, waxaan shaqo ka helay Semarang.



Markaan soo guuray ee ku soo noqday, billowgii way igu yare adkaatay. Laakiin durba caadi bay waxwalba noqdeen.



Waa hagaag, waad nafistay. Waxaan filayaa inaad hadda iska illowday.


Dadaal bay sameeyeen hadday ku cafiyeen.

Dhabahaantii, waa aniga qoka dadaalka ugu badan sameeyay.



Waxaan moodayay cafisku waajib inuu ku yahay Masiixiyiinta?

Haa, taasu waa run.



Assalaamu calaykum.

Wa calaykum assalaam.

Waxaan ahay Diini.




Diini aa?
Haa, waxaan ahay Diini. Hooyadaa ma joogtaa?
Haa, way joogtaa.
Diini yaa?
Hooyo, waa Diini.
Fadlan fadhiiso, Diini?
Dhawr maalmood ka hor, waxaan maqlay waxaad ku wada hadlayseen adiga iyo hooyo. Uma adkaysan karo. Waan ka xumahay.
Waxaan kuula dhaqmay si xun. Iga raalli ahoow.
Dhib malaha, Diini.

Fadlan ka raalli ahaada waxyaabihii khaldanaa ee aan labadiinaba idinku sameeyay. Waan ka xumahay, ee i cafiya.

Dhib malaha, Diini. Waan ku cafiyay.

Bambang wuxuu ila yimid Jakarta. Markaan degnay, waxaan siiyay lacag si uu ganacsi yar oo kabaha suuqa uga billaabo.

Saddex bilood kadibna, faa'iiduu helay oo lacag dambe iigama uusan baahan.

Xagguu hadda joogaa?

Wuxuu joogaa Jakarta. Wuu fiican yahay.

Mar kasta farxadda guusha waan la ooyaa.

Laakiin sidaa kuma dhammaan.

Maxaa dhacay dabadeed?

Ma wax ka sii fiican baa?

Haa, ka sii fiican. Wali waxaa jiray qof kale oo aan rabay inaan saamaxo.

Ma adeerkaa? Midkii guriga kaa caydhiyay?

Maya, maya. Isga mar horaan saamaxaye, waa aabbahay.

Ma aabbahaa? Wuxuuba dhintay adigoo gabadh yar ahe.

Waa sax. Wuxuuna igaga tagay fikir iyo cadho badan—oo anigu inaan xalliyo iga sugayay.

Haddana waad cafiday…

Haddeer.

Ma aragtaa qabuurahaa jidka ka shisheeya?

Haa waan arkaa.

Halkaasuu aabbahay ku aasan yahay. Illaa uu tareenkanu halkan soo istaagay wax yar horteed, cafis la'aantayduna halkaas ayay kula aasnayd. Laakiin Eebbe—maadaama uu yahay Eebbaha jacaylka—igama uusan yeelin sidaan rabay.

Wuxuu yidhi, haddii aan rabno in la inaga cafiyo dembiyadeena, waa inaan cafino kuwa inagu dembaabay.

Waxay u egtahay inuu Eebbe tareenka u joojiyay adiga aawadaa.

Wuxuu i faray inaan isaga raaco. Sida badan ma ogi halka uu ii wado, waxaanse ogahay inuu aamin yahay oo i gaadhsiinayo meesha aan rabo.

BRRRRRRR

Ha, ha! Wuu dhaqaaqay tareenku.

Haa, wuu dhaqaaqay.


BBBRRRRR
Waxaan filayaa in hadda ay halkaa ku dhammaatay sheekadu.
Armayse hadda uun billaabanaysaa?
Middanu farxad ma ku dhammaatay?
Abbaayo, waad ii sheegi doontaa siday ku dhammaato.

